Somali Public Agenda

Faallo Kooban 09

Maxaa Casharro ah oo Laga Baran Karaa Doorashooyinkii Dadbanaa ee Soomaaliya ee 2016?

Nofeembar 2020

Soo koobid

Soomaaliya waxa ay galeysaa doorasho dadban mar labaad sanadka 2020-21. Waa hannaan la yaqaanno oo la qabtay ku dhowaad afar sano kahor. Casharro badan ayaa laga baran karaa geeddi-socodkii hirgelinta doorashooyinkii dadbanaa ee 2016. Sanadkii 2016, qaar kamid ah musharraxiinta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa bixiyey kharashaadka saadka sida safarka iyo hoyga loogu talagalay ergooyinka doorashada (taasoo qeyb ahaan la rumeysan yahay inay ka caawisay doorashadooda); ma jirin wakhti loo qorsheeyey kulamada musharraxiinta iyo ergooyinka; taariikhda iyo wakhtiga loo codeynayo kursi kasta oo kamid ah Golaha Shacabka waxaa go'aamiyay hal dhinac oo ah kooxaha fulinaya doorashooyinka. Sanadkii 2016, qoondada haweenka ee baarlamaanka ayaa oo markii hore ahaa 14% ayaa laga dhigay 24%, taasoo ahayd koror aad u weyn. Tani waxa ay ahayd mid kamid ah waxyaabihii wanaagsanaa ee kasoo baxay doorashadii dadbanayd ee 2016; dadaallada noocan oo kale ah ayaa sidoo kale la samayn karaa markan si sare loogu qaado saamiga lana gaarsiiyo hiigsiga qoondada haweenka ee ah 30%. Faalladan kooban waxaa uu falanqeynayaa hannaankii hirgelinta doorashooyinkii dadbanaa ee 2016, waxaana uu soo jeedinayaa talooyin tixgelin mudan oo ay kamid yihiin: ka mamnuucidda musharixiinta in ay gacan ku yeeshaan xulista ergooyinka doorashada; in wakhtigeeda lagu bixiyo saadka loo baahan yahay iyo hoyga ergada; diyaarinta jadwalka ololaha rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha iyo musharraxiinta; daabacaadda jadwalka doorashada ee kursi kasta xilli hore; u oggolaanshaha warbaahinta iyo kormeerayaasha doorashada in ay goobjoog ka ahaadaan xilliga cod-bixinta, iyo la socoshada iyo soo gudbinta khaladaadka inta lagu guda jiro hannaanka doorashada.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2020 Somali Public Agenda

Raad-raac

Doorasho dadban oo labaad ayaa la jadwaleeyey in ay mar kale ka dhacdo Soomaaliya dabayaaqada sanadka 2020 iyo horraanta sanadka 2021. Sida ay ku heshiiyeen madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha xubnaha ka ah Dowlada Federaalka 17-kii Sebteembar ee 2020, doorasho dadban ayaa ka dhici doonta labo degmo oo kamid ah dowlad-goboleed walba, halkaas oo ergooyinka doorashada ee lagasoo xulay beelaha ay u codeynayaan kursi kasta oo kamid ah Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. 54-ta xubnood ee Aqalka Sare waxaa sidoo kale soo dooran doona xildhibaannada dowlad-goboleedyada, si lamid ah hannaankii doorashada ee 2016.

Sanadkii 2016-kii, ergooyin doorasho oo ka badan 14 kun oo muwaadin oo lagasoo xulay beelaha ayaa soo doortay 275-ta xubnood ee Golaha Shacabka ee baarlamaanka 10-aad. Muddo xileedkooda waxa uu dhammaan doontaa 27-ka Diseembar ee 2020. Doorashada 2016-kii waxa ay ka dhigneyd ama muujisey horumar marka loo eego xulashooyinkii 2012. Sanadkii 2012, 135 oday-dhaqameed ayaa soo xuley 275 xubnood oo baarlamaanka ah (mana jirin Aqalka Sare xilligaas) kadib markii 825 qofood ay meel mariyeen dastuur cusub oo kumeelgaar ah bishii Agoosto ee sanadkaas.

Si lamid ah rajadii laga qabay doorashada 2020-21, dastuurka kumeelgaarka ah waxaa uu saadaaliyay in doorasho qof iyo cod ah ay dhici doonto sanadka 2016-ka. Qorshihii Hiigsiga 2016-ka, oo ay diyaarisay Dowladda Federaalka Soomaaliya bishii Sebteember 2013, waxaa uu soo bandhigey qorshe hageya howlaha dowladda ilaa dhammaadka muddo-xileedkeeda ee Agoosto 2016 (Vision2016, 2013). Hiigsigii 2016 waxaa uu tilmaamey saddex ujeeddo oo muhiim ah in la gaaro: federaaleynta, dib-u-eegista iyo ansixinta dastuurka, iyo doorashooyin qof iyo cod ah oo dhaca sanadka 2016. Sikastaba ha noqotee, suurtagal la'aanta in la xaqiijiyo hamiga ah in la qabto doorasho qof iyo cod ah waxaa si cad u shaacisay Dowladda Federaalka Soomaaliya dabayaaqadii bishii Luulyo ee 2015.

Hoggaanka dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada oo ay weheliyaan beesha caalamka ayaa sameeyay Madasha Wadatashiga Qaran si looga doodo isbeddelka siyaasadeed ee 2016. Madashu waxa ay soo jeedisay afar nooc doorasho oo kala ahaa doorasho heer qaran ah, doorasho heer dowlad-goboleed ah, doorasho heer degmo ah iyo doorasho ku saleysan qabiil (The Somali National Consultative Forum, 2015). Intaas waxaa dheer, Madasha Hogaamiyeyaasha Qaran oo ka koobnaa madaxweynaha federaalka, raysal wasaaraha, afhayeenka golaha shacabka iyo afar madaxweyne dowlad-goboleed ayaa la sameeyay dhammaadkii 2015 si loo diyaariyo hannaanka doorashada. Madashu waxa ay isku raacday qaab doorasho ku saleysan beelo bishii Abriil ee 2016.

Xubnaha Madasha Hogaamiyaasha Qaranka ayaa shirar dhowr ah ku qabtay magaalada Muqdisho iyo magaalooyin kale oo ka tirsan Soomaaliya. Doodo badan oo kulul kadib, xubnaha Madasha waxa ay isku raaceen qaabka xulista Aqalka Sare, oo dhisitaankiisa lagu qeexay dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya iyo Golaha Shacabka. Qaabka ayaa soo jeediyay in doorashooyinka xubnaha labada gole ee baarlamaanka lagu qabto caasimadaha dowladaha xubnaha ka ah Federaalka.

51 ergo oo ka kooban xubnaha jufooyinka – oo 30% ay noqonayaan haween halka 20% ay noqonayaan dhalinyaro – ayaa la isku raacay in ay doortaan xubin kasta oo ka tirsan baarlamaanka. 135-tii oday dhaqameed ee soo xulay baarlamaanka Soomaaliya ee 2012 ayaa la siiyay sharciyad ay ugu soo gudbiyaan liiska cod-bixiyeyaasha kooxda doorashada dowlad-goboleedka, oo sidoo kale nuqul kamid ah liiska u diraya guddiga doorashada ee heer federaal. Xubnaha Madasha Hogaamiyaasha Qaran waxay sidoo kale isku raaceen qoondada haweenka ee 30% (Somali National News Agency, 2016). Muwaadin kasta oo haysta ugu yaraan shahaadada dugsiga sare, da'diisu ka weyn tahay 25 sano, bixiyana khidmada diiwaangelinta oo aheyd $5,000 (50% dhimis ayaa loo sameeyey haweenka musharraxiinta ah) waxaa uu xaq u lahaa in uu u tartamo kursi kamid ah Baarlamaanka. Sidoo kale, beesha caalamka, oo ku bixisey hannaanka doorashada taagero siyaasadeed, dhaqaale, amni iyo mid saadba ayaa door muhiim ah ka qaadatey qaabeynta iyo hirgelinta doorashooyinkii dadbanaa.

Sidoo kale, sameynta Guddiga Federaalka ee Hirgelinta Doorashooyinka Dadban oo ka kooban 22 xubnood iyo Kooxda Hirgelinta Doorashooyinka Dadban ee Dowlad-Goboleedyada oo ka kooban 11 xubnood ee dowlad goboleed kasta ayaa la isku raacay, taasoo ka dhigan toddobo guddi doorasho guud ahaan (lix guddi doorasho oo dowlad-goboleedyada ah iyo hal guddi doorasho oo heer federaal ah). Sidoo kale, guddiga xallinta khilaafaadka federaalka ee dadban ayaa la sameeyey si uu u xalliyo khilaafaadka doorashada, musharraxiinta cabashada qaba ayaana sidoo kale lagu waajibiyey in ay bixiyaan $1,000 mid kiiba oo ah khidmada diiwaangelinta.

Habka Cilmibaarista Loo Sameeyay

Si loo fahmo sida doorashadii dadbaneyd ee 2016 looga hirgeliyay Soomaaliya, dhowr xog-ogaal oo muhiim ah ayaa laga wareystay lixda magaalo ee martigeliyay doorashada xubnaha golaha shacabka ee baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya. Tiro dhan 12 qofood ayaa lagu wareystay Kismaayo (2), Baydhabo (2), Muqdisho (2), Jowhar (2), Cadaado (2), iyo Garowe (2) bishii Janaayo 2017. Waxaa dadka la wareystay kamid ahaa codbixiyeyaasha, kormeerayaasha, wakiilo warbaahineed, cilmibaarayaal, iyo musharraxiin tartamay.

Ujeeddada daraasadda ayaa ahayd in la qiimeeyo madax-bannaanida hay'adaha doorashooyinka, hannaanka geeddi-socodka hirgelinta doorashada, qoondada haweenka, doorka bulshada caalamka, iyo natiijada doorashada dadban. Intaa waxaa dheer, indha indheyn guud iyo dib-u-eegis lagu sameeyay qoraaladda laga sameeyay doorashooyinka sidoo kale waxaa loo isticmaalay in lagu kabo falanqeynta iyo natiijooyinka.

Wadarta tirada wareysiyadu way xadidnaayeen, keliya laba xog-ogaal ayaa la xushay oo lagu waraystay lixdii magaalo doorasho. Inta badan wareysiyada waxaa lagu qaaday khadka taleefanka. Ujeeddooyin anshax iyo sir ahaaneed awgeed, dhammaan dadka la wareystay waa la qariyey magacyadooda.

Madaxbanaanida iyo U-dhannaanshaha Guddiyada Doorashooyinka

Xubnaha Madasha Hoggaamiyeyaasha Qaran waxay soo xuleen Kooxda Federaalka ee Hirgelinta Doorashooyinka Dadban iyadoo lixda Koox ee Hirgelinta Doorashooyinka Dadban ee heer Dowlad Goboleed. Matalaaddoodu waxay ku saleysneyd '4.5' oo ah hannaanka awood qeybsiga qabiilka ee xafiisyada dowlada Soomaaliya iyo xubnaha guddiyada madaxa bannaan. Waxaa jiray wakiillo heer dowlad-goboleed ah oo ka tirsanaa guddiga heer federaal, iyo wakiilo heer dowladda federaalka oo xubno ka ahaa guddiyada dowlad-goboleedyada. Inta badan dadka la wareystay waxay isku raaceen in marka loo eego ka qeyb-galka, guddiyada doorashada dadban ay ahaayeen kuwo loo dhan yahay iyo in dhammaan beelahaku kala nool gobollada ay matalaad ku yeesheen. Si kastaba ha noqotee, hoggaamiyeyaasha federaalka iyo kuwa maamul-goboleedyadu waxay magacaabeen xubnaha guddiyadan iyagoo aan wadatashi badan la samayn maamulladooda.

Ku dhowaad dhammaan dadkii la wareystay waxay ku jawaabeen in kooxaha hirgelinta doorashooyinka aysan madax-bannaanayn. Hoggaanka federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyaduba waxay saameyn ku lahaayeen shaqada guddiyada. Xubnaha Madasha Hoggaamiyeyaasha Qaranka waxay guddiyada u magacaabeen xaasiibbadood. Tusaale ahaan, gudoomiyaha guddiga hirgelinta doorashooyinka dadban ee federaalka wuxuu ahaa lataliyaha dhanka sharciga ee madaxweynaha federaalka, gudoomiyaha guddiga Jubaland wuxuu lataliye u ahaa madaxweynaha Jubaland, gudoomiyaha guddiga Koofur Galbeed wuxuu saaxiib dhow la ahaa madaxweynaha xilligaas. Hoggaamiyeyaasha kale ee dowlad-goboleedyada ayaa sidoo kale u magacaabay guddiyada saaxiibo u dhow. Tani waxay saameyn weyn ku yeelatay madax-bannaanida guddiyada. Madaxweynayaasha maamul goboleedyadu waxay saameyn weyn ku yeesheen guddiyada doorashooyinka dowlad goboleedyada iyo sida ay u maamulayeen arrimaha doorashada. Waxaa muuqata in saameyntan ay jireyso doorashooyinka dadban ee 2020-21 waxaana xukuumadda hadda jirta ee federaalka iyo qaar kamid ah madaxda dowlad-goboleedyadu ay saaxiibo dhow u magacaabeen kooxaha hirgelinta doorashada ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed si loo hubiyo in howlaha doorashada ay keenaan natiijooyinka ay iyagu rabaan.

Hannaanka Hirgelinta

Geedi-socodkii hirgelinta doorashooyinkii dadbanaa ee golaha shacabka ayaa ku dhacay saddex marxaladood. Marxaladda koowaad, odayaasha beelaha ayaa soo xulay unasoo gudbiyeen ergooyinka doorashada guddiyada doorashada. Ergada iyo musharrixiinta ayaa kulmay marxaladda labaad ee doorashada. Marxaladda ugu dambeysa, guddiyada doorashooyinka dowlad-goboleedyadu waxay fududeeyeen doorashooyinka xildhibaannada ka dibna waxay ku dhawaaqeen guuleystayaasha.

Marxaladda Koowaad: Xulista ergooyinka doorashada

Sida lagu faahfaahiyay war-murtiyeedkii kasoo baxay shirkii Madasha Hoggaamiyeyaasha Qaran bishii Abriil 2016, doorashooyinka baarlamaanka waxaa lagu saleeyay beelo, 51 ergo oo ka socda beel kasta ayaana u codeeyay wakiilka qabiilka ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya (Somali National News Agency, 2016). Nidaamka rasmiga ah wuxuu ahaa in odayaasha dhaqanka ee beelaha (135-kii oday ee soo xulay xildhibaannadii 2012), kadib markii ay la tashadeen hoggaanka dhaqanka jufooyinka, mid walba wuxuu soo xulay 51 ergo, kuwaasoo iyagana doortay xildhibaanka beeshaas ku matalaaya baarlamaanka. Dhammaan 275-ka kursi ee Golaha Shacabka waxaa loo qoondeeyay musharraxiinta beelaha iyadoo lagu saleynayo nidaamka 4.5. Musharraxiinta ayaa awood u yeeshay inay saameyn ku yeeshaan marxaladdan hawsha soo-xulista ergada. Sida uu sheegay mid kamid ah dadka la wareystay, qaar kamid ah tartamayaashu waxay qoreen liistada ergada kaligood. Tani iskama aysan dhicin. Musharraxiinta ayaa la sheegay inay awood u yeesheen inay laaluushaan odayaasha beelaha ee xulaya ergooyinka kahor inta aan liisaskooda loo gudbin guddiyada heer dowlad-goboleed iyo heer federaal ee hirgelinta doorashooyinka. Musharaxiinta qaar waxay awoodeen inay ku daraan shaqaalahooda amniga iyo darawalladooda ergooyinka doorashada (Marqaati, 2016).

Marxaladda Labaad: Saadka iyo maalgelinta ololaha

Marxaladda labaad ee hannaanka hirgelinta doorashada waxaa kamid ahaa u-qaadista ergooyinka ee xarumaha doorashooyinka iyo xiriirka tooska ah ee ergooyinka iyo musharraxiinta. Musuqmaasuqa iyo laaluushka ayaa aad ugu badnaa marxaladdan. Bilowgii, beesha caalamka iyo guddiyada doorashada waxay ballanqaadeen inay bixinayaan kharashka duullimaadyada iyo hoyga ee ergooyinka. Sikastaba ha noqotee, way ku guuldareysteen inay ku bixiyaan kharashka saadka wakhtigii loogu talagalay. Intaa waxaa dheer, bixinta lacagta loo qorsheeyay in la siiyo ergey kasta si ay iskaga bixiyaan kharashyada intii ay ku sugan yihiin xarunta doorashada oo ahayd $200 aad ayey gaabis u ahayd qaarna wey isaga tageen sababo la xariira gaabiska xafiisyada nidaamka lacag-bixinta. Sidaas darteed, musharraxiinta waxay buuxiyeen booskaas waxayna dabooleen dhammaan kharashaadkii ay galeen ergooyinka iyo weliba lacago kale oo dheeri ah. Tani waxay saameyn ku yeelatay natiijada codeynta.

Qaar kamid ah musharraxiinta ayaa la sheegay inay laaluush siiyeen xubno ka tirsan guddiyada hirgelinta doorashooyinka ee dowlad-goboleedyada si ay u beddelaan ergooyinka doorashada qeyb ahaan ama gebi ahaanba, ama u cabsi geliyaan musharraxiinta kale iyaga oo ka doorbidaya midka lacagta siiyay. Sida lagasoo xigtay qaar kamid ah dadka la wareystay, qaar kamid ah musharraxiinta u taagan xilka madaxweynaha federaalka ayaa sidoo kale saameyn ku yeeshay kuraasta qaar iyagoo maalgeliyay musharrax si uu ugu guuleysto kursiga ama si looga adkaado tartamayaasha kale. Musharraxiinta u taagan xilka madaxweynenimo ayaa tan sameeyay maxaa yeelay xildhibaannada ayaa dooranaya Madaxweynaha. Sidoo kale, qaar kamid ah musharraxiinta madaxweynaha waxay taageero dhaqaale siiyeen haweenka kasoo jeeda beelaha qaar si ay ugu guuleystaan kuraasta haweenka loo qoondeeyey, maadaama haweeney looga baahan yahay in laga doorto saddexdii kursi ee beel kasta si ay u buuxiso qoondada haweenka ee 30%.

Sikastaba ha noqotee, musuqmaasuqa ugu badan iyo cod iibsiga ayaa dhacay maalin iyo / ama habeen kahor doorashada. Mid kamid ah ergooyinka ku sugan Jowhar oo la wareystay ayaa yiri: "Tartamaha ugu lacag bixinta badan ayaa markasta guuleysanayay". Mid kale oo lagu wareystay Kismaayo ayaa isna soo qaaday dhowr nooc oo dhaqanxumo ah. Wuxuu ku dooday inaysan jirin habraac rasmi ah iyo wakhtiyada musharraxiinta ay la kulmayaan ergooyinka si ay ugu jeediyaan waxqabadkooda. Natiijo ahaan, musharraxiinta qaar waxay xareysteen ergo, waxay siiyeen lacag waxayna ka ursadeen taleefannadooda gacanta si ay u diidaan la xiriirka kuwa kale ee la tartamaya. Qaar kale waxay laaluusheen xubnaha guddiyada doorashada dowlad-goboleedyada si ay ugu fududeeyaan doorashadooda iyo / ama inay ergo xareystaan daqiiqadaha ugu dambeeya. Xaaladaha qaarkood, guuleystayaashu waxay sameeyeen tartame been ah (malxiis ah) oo ay maalgeliyeen si ay ugu muujiyaan dadweynaha iyo warbaahinta in kursiga lagu tartamay.

Musuqmaasuqa ayaa ahaa mid sareeya doorashadii baarlamaanka ee 2016 marka loo eego hannaankii doorasho ee 2012. Sanadkii 2012, musharraxiinta qaar waxay lacag siiyeen oday dhaqameedka soo xulayay keliya, laakiin 2016, musharraxiinta waxay lacago siiyeen odayaasha beelaha, guddiyada fulinta doorashooyinka mararka qaar, iyo 51 ergo ee iyaga doortay. Sida mid kamid ah dadka la wareystay uu

u dhigay, "waxay ahayd dhaqaale la qeybinaayo ". Sida laga soo xigtay Hanti-dhowraha Guud ee Soomaaliya, “codadka qaar waxaa lagu iibsaday $5,000, qaar waxaa lagu iibsaday $10,000, qaarna $20,000 ama $30,000” oo la siiyay qof kasta oo kamid ahaa ergada (Radio Dalsan, 2016). Wuxuu intaas ku daray labo kursi oo gaar ah inay ku baxday $1.3 milyan (oo laaluush ah) midkiiba (Voice of America, 2016).

Beesha Caalamka ayaa soo saartay war-murtiyeedyo dhowr ah oo ay ku eedeyneyso musuqmaasuq iyo cabsi gelin, waxayna su’aal gelisay sharcinimada natiijada doorashada. Boqortooyada Ingiriiska, Mareykanka iyo Iswiidhan ayaa markii dambe uga digay muwaaddiniintooda labada dhalasho heysta in dhaqamada musuqmaasuqa ee ka jira Soomaaliya ay mudan doonaan ciqaab sharciyadooda ah.

Marxaladda Saddexaad: Codaynta ergooyinka

Marxaladda ugu dambeysa ee geedi-socodka hirgelinta doorashada waa maalinta doorashada. Sida ay isugu xigxigaan howlaha doorashooyinka dadban inta badan malahayn qorshe cad. Sidaas darteed, guddiyada doorashooyinka waxay sameeyeen habraacooda fulineed inta lagu gudajiray doorashooyinka. Tusaale ahaan, sida ay isugu xigxigaan kuraasta, wakhtiga doorashada, iyo habka loo keenayo wufuudda hoolka doorashada, iyo kuwa kale, badanaa ma lahayn tilmaamo qoran guddiyada ayaana go’aan ka gaarayay. Sidaas darteed, guddiyadu waxay doorashada kuraasta isugu xigxijiyeen sida ay iyagu rabeen.

Sida lagu sheegay warbixin ay soo saartay Marqaati, oo ah hay'ad maxalli ah oo aan dowli ahayn oo diiradda saarta musuqmaasuqa, kuraasta qaar ayaa loo codeeyay iyada oo aan la ogeysiinin dhammaan musharraxiinta (Marqaati, 2016). Guud ahaan, idaacadaha ayaa goobjoog ka ahaa marxaladan. Si kastaba ha noqotee, doorashada dhowr kursi weriyayaashu ma joogin, mana jirin nidaam mideysan ama rasmi ah oo lagu dhawaaqo natiijada codadka.

Intaas waxaa dheer, ma jirin farsamo lagu xalliyo khilaafaadka kahor doorashooyinka. Tusaale ahaan, sida lagasoo xigtay qof la wareystay, ciidamada amniga ayaa garaacay haweeney musharrax ka ahayd magaalada Kismaayo waxaana lasoo gabagabeeyay doorashadii kursiga natiijadana waa lagu dhawaaqay iyadoo weli cabasho qabta. Intaas waxaa dheer, kaalinta iyo masuuliyadaha guddiga xallinta khilaafaadka ma aysan cadeyn. Waxay la macaamilayeen beelo, wakhtiguna aad buu ugu yaraa iyaga inay si sax ah u baaraan kiisaska la musuqmaasuqay. Guddiga xallinta khilaafaadka waxay shaaciyeen inay heleen oo ay baareen 67 kiis. Guddigu wuxuu soo xulay 24 kiis oo halis ah wuxuuna baabi'iyay 11 kamid ah (Goobjoog, 2016). Beesha Caalamka oo ay wehliyaan qaar kamid ah siyaasiyiinta ayaa ka horyimid go’aanka guddiga xallinta khilaafaadka iyo qaar faragelin la sheegay inuu ku sameeyay xafiiska Madaxweynaha. Ugu dambeyntiina, xubnaha Madasha Hoggaamiyeyaasha Qaran waxay isku raaceen in shan kursi dib loo dooran doono halka lix kamid ah 11-ka kursi ee la laalay la siiyay xubinnimada buuxda ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya (Villa Somalia, 2016).

Qoondada Haweenka

Mid kamid ah guulaha qeyb ahaan kasoo baxay doorashadii baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya ayaa ahayd hirgelinta qoondada haweenka ee 30%. Sannadkii 2012, 14% kamid ah 275-ka xildhibaan waxay ahaayeen haween, – 16% way ka yarayd sidii la filayay oo ahayd 30%. Si kastaba ha noqotee, sanadkii 2016, 24% xubnaha labada gole ee baarlamaanka waxay ahaayeen haween. Tani waxay ahayd koror 10% ah waxa ayna guul muhiim ah u ahayd dadkii ka shaqeeyay sugidda qoondada dumarka, gaar ahaan beesha caalamka iyo ururrada haweenka.

Waxyaabo badan ayaa gacan ka gaystay hirgelinta qoondada haweenka ee doorashada baarlamaanka ee 2016. Ugu horreyn, kooxaha haweenku waxay sameeyeen u ololeyn iyo wacyigelin kahor bilowgii geeddi-socodka doorashada. Midda labaad, bulshada caalamku waxay la wadaagtay Madasha Hoggaamiyeyaasha Qaranka iyo guddiyada doorashooyinka liiska beelaha iyo kuraasta gaarka ah ee haweenka kaliya ay ku tartami karaan. Midda saddexaad, madaxda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyadu way ixtiraameen oo si cad u taageereen qoondada haweenka. Ugu dambeyntiina, guddiyada doorashooyinka heer dowlad-goboleed iyo heer federaal ayaa qoondada haweenka ka dhigay mid khasab ku ah reeraha. Guddiyada ayaa mararka qaar isku dayay inay ka dhigaan kuraasta haweenka kan ugu horreeya saddexda kursi ee la doorto ee beel kasta. Si kastaba ha noqotee, waxaa jiray kiisas qaarkood oo qoondada la siyaasadeeyay oo ay noqotay aalad loo adeegsado in lagaga adkaan karo musharraxiinta saamaynta leh iyadoo loo asteeyay kuraastooda haween. Inkastoo arrimahaas is biirsaday ay mas'uul ka ahaayeen in 10% kuraas dheeraad ah ka helaan haween baarlamaanka, haddana qaar kamid ah haweenka tartamayay ayaa awood u lahaa inay la tartamaan ragga dhiggooda ah ayna ku guuleystaan kuraasta. Tusaale ahaan, haweeney ayaa la tartantay kana adkaatay shan nin oo ku tartamay kursi aan si gaar ah haween loogu asteynin.

Iyadoo ay guulahaasi jireen, haddana qoondada haweenka waxaa soo food saaray caqabado. Qorshuhu wuxuu ahaa in beel walba oo laheyd saddex kursi hal haween loo doorto. Si kastaba ha noqotee, beelaha qaar waxay lahaayeen wax kayar saddex kursi, kuraasta beelaha qaar waxaa lagu dooranayay dowlad-goboleedyo kala duwan. Xaaladaha qaarkood, in dumar keliya ee ku tartamaan kursiga haweenka lama ixtiraamin oo rag ayaa la tartamay. Heshiiska asteynta kuraasta ee dumarka waxaa badanaa loo arkayay mid kumeelgaar ah. Si kastaba ha noqotee, dhammaan intii ka shaqeysay hagaajinta metelaadda haweenka waxay gaareen horumar la taaban karo oo ku aaddan in baarlamanka Soomaaliya laga dhigo mid lamid ah ama uga sarreeya waddamada horumaray qaarkood marka la eego saamiga haweenka ee baarlamaanka federaalka soo galay 2016.

Kaalinta Beesha Caalamka

Howlgalka Kaalmeynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya ee UNSOM iyo hay'ado kale oo caalami ah ayaa taageeray sameynta Madasha Hoggaanka Qaranka, oo iyadu lafteeda farsameysay hannaanka doorashada. Sidoo kale, bulshada caalamku waxay kafaala-qaaday ku dhowaad 60% kharashyada doorashada, oo lagu bixinayo inta badan saadka, cuntada, mashiinnada kaararka codbixinta, madbacadaha, iyo amniga. Ciidamada Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya ee loo yaqaan AMISOM ayaa la geeyay goobo badan oo doorashada lagu qabtay intii ay socdeen doorashooyinka. Mararka qaarkood, beesha caalamku waxay saameyn ku yeelatay geeddi-socodka, gaar ahaan marka la eego qoondada haweenka. Wakiilo ka socda beesha caalamka ayaa u kuur galayay hanaanka hirgelinta doorashada ee dhammaan lixda goobood ee doorashada. Tani waxay gacan ka gaysatay habsami u socodsiinta hawsha doorashada. Si kastaba ha noqotee UNSOM waxay soo saartay waraaqo dhowr ah oo su'aal gelinaya kalsoonida doorashooyinka iyo ku-takrifalidda kuraasta qaar (UNSOM, 2016).

Inkastoo ay jireen dadaalladan lagu taageerayo geeddi-socodka doorashooyinka, in badan oo kamid ah dadkii la wareystay ayaa dhaleeceeyay kaalinta beesha caalamka sababo badan awgood. Midda koowaad, ciidamada AMISOM lama geyn xarumaha doorashada wakhtigii loogu tala galay. Cadaado iyo Jawhar – oo kala ah caasimadaha dowlad-goboleedyada Galmudug iyo Hirshabeelle – waa laba tusaale. Tani waxay noqon kartaa mid kamid ah dib-u-dhacyada ku iman karo doorashooyinka 2020/21. Midda labaad, beesha caalamku kuma bixinin lacagaha wakhtigooda. Qaar kamid ah dadka la wareystay ayaa soo qaatay nidaamka UN-ka oo adag taasoo keentay dib-u-dhaca mushaaraadka guddiyada doorashooyinka. Ugu dambeyntiina, hay'adaha caalamiga ah ayaa ku guul-darreystay diyaarinta diyaarado loogu talagalay ergooyinka. Tani waxay u oggolaatay musharraxiinta inay daboolaan kharashka safarka iyo hoyga ee ergada, taasoo ahayd laaluush saameyn ku yeeshay codeynta ergada.

Natiijada Doorashada

Doorashadiii 2016-ka ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxay lahayd meelo ay iskaga mid ka yihiin iyo kuwa ay ku kala duwanyihiin doorashadi (xulitaankii) 2012. Sannadkii 2012, xulashada waxaa qorsheeyey oo abaabulay lix saxiixayaal; halka toddobo xubnood oo ka tirsan Madasha Hoggaanka Qaran ay qorsheeyeen geeddi-socodka doorashada 2016. Isku ekaansho kale ayaa ah in labada doorasho loo isticmaalay habka awood qeybsiga ee 4.5 oo lagu qeybiyay kuraasta baarlamaanka. Si kastaba ha noqotee, waxaa jiray labo kala duwanaansho oo waaweyn. Marka hore, halka sanadkii 2012, xulista lagu qabtay magaalada Muqdisho, sanadkii 2016 doorashada waxaa lagu qabtay dowlad-goboleedyada. Taasi waxay ahayd tallaabo wanaagsan oo loo qaaday dhanka doorashada tooska ah sannadka 2020-21, inkastoo taasi

hadda lagu fashilmay inay hirgasho. Tan labaad, 51 ergo ayaa u codeeyay kursi kasta oo golaha shacabka ee baarlamaanka ah sanadkii 2016, oo wadar ahaan ah in ka badan 14 kun oo qofood. Tani waxay caddeyn u tahay in kaqeybgalka si aad ah uu u kordhay doorashadii 2016 marka la barbardhigo 2012 oo ay 135 oday oo keliya ay awood u lahaayeen soo xulista 275 xildhibaan.

Sikastaba ha noqotee, kororka kaqeybgalka iyo daadajinta doorashada 2016-ka ee dowlad-goboleedyada waxey laheyd faa'ido iyo khasaaraba. 55% xildhibaannada way cusbaayeen. Taas macnaheedu waxa weeye in sharci-dejiyeyaal badan aysan awoodin inay sii hayaan kuraastooda baarlamaanka, taas oo ahayd wax wanaagsan. Marka labaad, tirada haweenka ee baarlamaanka aad ayey u kordheen. Midda saddexaad, tiro aad u badan oo dhallinyaro ah ayaa kusoo biiray golaha. Toddobadii xildhibaanba mid ayaa da'diisu ka hooseeysey 35 sano. Sida wareysiyada la qaaday muujinayaan, tani waxay ka dhalatay kororka tirada ergooyinka u codeynaya kursi kasta iyo in qaar kamid ah sharci dejiyeyaashu aysan ku lahayn saameyn siyaasadeed ama galaangal deegaannada ay matalaan.

Inkastoo waxyaabahaas wanaagsan jiraan, haddana musuqmaasuqu wuu sarreeyay. Qaar kamid ah dadkii la wareystay ayaa aaminsanaa in doorashadii baarlamaanka (xildhibaannada) 2016 ay aheyd tii ugu musuqmaasuqa badneyd taariikhda Soomaaliya. Inta badan guuleystayaashu waxay heleen inta u dhexeysa 80% iyo 100% codadka, taasoo "istaastistik ahaan [aan] macquul aheyn inay ka dhacdo doorasho xor iyo xalaal ah" (Marqaati, 2016). Intaa waxaa dheer, habraacyadu way cilladeysanaayeen, tirada dallaalayaasha siyaasadeed ayaa kordhay, kuraasta si cadaalad ah loogu tartamayna way yaraayeen. Sidoo kale, madaxda federaalka iyo dowlad goboleedyada (oo qaarkood musharraxiinta madaxweyne kamid ahaa) saameyn weyn ayey ku yeesheen natiijooyinka doorashooyinka, iyo in hantidii ummadda la lunsaday loona isticmaalay dano gaar ah. Habdhaqan-xumadaasi waxay dhaawaceen kalsoonidii iyo sharcinimadii doorashadii 2016 ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Talooyin Tixgelin Mudan

Si aanay u dhicin mar kale khaladaadki dhacay doorashadi 2016-ki, qormadan waxey soo jeedinaysaa dhowr talooyin:

1. Xulista ergooyinka beelaha waa inay noqotaa mid ka madax bannaan siyaasiyiinta tartamaya. Kooxaha hirgelinta doorashada heer federaal iyo heer dowlad-goboleed waa inay hubiyaan in musharraxiinta aysan ku lug lahayn xulista ergooyinka. Hay'adduhu waa inay damaanad qaadaan in laga fogaado khaladaadkii dhacay 2016, halkaasoo musharraxiinta qaar ay awood u yeesheen inay wax-isdaba-marin ku sameeyaan howlaha iyo – xaaladaha qaarkood – inay qoraan liiska cod-bixiyeyaasha.

2. Guddiyada doorashada (iyo beesha caalamka) waa inay damaanad qaadaan in saadka, safarka iyo hoyga ergada la daboolo oo loo diyaariyo lana bixiyo kharashaadka loo baahan yahay wakhtigiisa. Ka gaabinta arrintan waxay siinaysaa musharraxiinta fursad ay ku buuxiyaan booskaas waxaana ka dhalanayo dano is diiddan oo iyaduna u adeegaysa danaha musharraxiinta islamarkaana si aan caddaalad ahayn u saamaynaysa geeddi-socodka doorashada.

3. Waa in la diyariyaa wakhti rasmi ah oo la qorsheeyey oo ay musharraxiinta la kulmi karaan ergada una jeedin karaan khudbadaha ololaha doorashada. Wakiillada ka socda guddiyada doorashada waa inay kormeeraan hawshan. Warbaahinta waa in loo fududeeyaa tabinta howlaha doorashada si khudbadahaas loogu baahiyo dadweynaha. Tani waxay yareyn doontaa fursadaha laaluushidda ergada waxayna soo kordhineysaa qeyb weyn oo kamid ah tartan siyaasadeed oo dhab ah. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la qorsheeyo lana muddeeyo isku xigxigga codeynta kursi kasta oo kamid ah Golaha Shacabka. Jadwalka waa inuu ahaadaa mid si guud loo heli karo, si gudigga fulinta doorashada dowlad-goboleedka aysan kaligood go'aan uga gaarin taariikhda iyo wakhtiga codeynta ay dhaceyso.

4. Warbaahinta iyo kormeerayaasha doorashada waa inay goobjoog ka ahaadaan xarun kasta oo codbixinta marka codbixinta ay dhaceyso. Kooxo firfircoon oo xirfadlayaal ah oo lagasoo xulay warbaahinta iyo bulshada rayidka ah waa in la geeyo goob kasta oo kamid ah 11-ka deegaan doorasho ee dalka. Waxey arrintani muhiim u tahay oo ay kaalin ka qaadaneysaa hufnaanta doorashada.

5. Metelaadda haweenku waa inay noqotaa dadaal wadajir ah oo ay horumuud u yihiin madaxda qaranka iyo kuwa dowlad-goboleedyada, guddiyada hirgelinta doorashooyinka iyo odayaasha dhaqanka. Khariidad cad oo la dhaqangelin karo oo qoondada haweenka ah waa in ay u jaangooyaan guddiyada doorashada oo kaashanaya odoyaasha dhaqanka, loona dhaqangeliyo sida lagu heshiiyo. Qoondada haweenku maahan in la siyaasadeeyo oo loo isticmaalo in lagula dagaallamo siyaasiyiin sidii dhacday 2016.

Tixraac

Goobjoog (2016) Goobjoog Web page, 14 Dec, [Online], Available: http://goobjoog.com/english/somalias-dispute-resolution-committee-nullifies-outcome-elections- 11-seats-across-somalia/ [13 Jan 2017].

Marqaati (2016) Marqaati Web page, December, [Online], Available: https://marqaati.org/en/2016/12/the-indirect-elections-highly-irregular-and-barely-legitimate/ [13 January 2017].

Radio Dalsan (2016) Radio Dalsan Web page, 22 November, [Online], Available: http://www.radiodalsan.com/2016/11/22/civil-society-concern-over-the-parliamentary-elections/ [13 January 2017].

Somali National News Agency (2016) Somali National News Agency Web page, 10 August , [Online], Available: http://sonna.so/en/communique-of-the-national-leaders-forum/ [17 December 2016].

The Somali National Consultative Forum (2015) 'The Somali National Consultative Forum on the Electoral Process in 2016', Villa Somalia, November.

UNSOM (2016) United Nations Assistance Mission in Somalia Web page, 21 December, [Online], Available: http://unsom.unmissions.org/international-community-urges-national-leadership-forum-uphold-accountability-transparency-and [14 January 2017].

Villa Somalia (2016) Villa Somalia Web page, 27 December, [Online], Available: http://www.villasomalia.gov.so/warmurtiyeed-madasha-hoggaamiyeyaasha-qaran-mhq/ [16 January 2017].

vision2016 (2013) Villa Somalia, 6 Sep, [Online], Available: http://www.villasomalia.gov.so/wp- content/uploads/2014/11/VISION2016-_Final_COMMUNIQUE1.pdf [10 Nov 2015].

Voice of America (2016) Voice of America Web page, 19 November, [Online], Available: http://www.voanews.com/a/somalia-elections-lack-credibility-auditor-general-says/3603878.html [13 January 2017].

***Tixanaha Doorashada**: Waxa aan bilownay qormooyin tixane ah oo la xiriira doorashooyinka. Qormo kasta waxa ay falanqeyneysaa mowduuc la xiriira doorashada. Faalladan waa middii afaraad ee tixanaha. Somali Public Agenda waxa ay soo dhaweyneysaa talooyinka iyo fikradaha la xiriira doorashooyinka la filayo in ay ka dhacaan Soomaaliya.*

SOMALI PUBLIC AGENDA
Mogadishu - Somalia

Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO TRANSLATIONS